

Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka

libsiga UnitedHealth ee Amedisys

Barnaamijka [Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka](#) (HCMO) wuxuu dib u eegid ku sameeyaa kala iibsiga ganacsiga si loo xaqiijiyo inaysan dhibin dadka iyo bulshooyinka ku sugan Oregon. Diseembar 4, 2023, OHA waxay aqbashay ogaysiis [dhamaystiran](#) oo ka socda UnitedHealth Group Incorporated oo sharraxaya qorshayaasha lagu iibsanayo Amedisys, Inc. Maarso 14, 2024, OHA waxay dhammavaystirtay [dib-u-eegis horudhac ah](#) oo la go'aamiyay in wax kala iibsiga uu u baahan yahay dib-u-eegis dhamaystiran.

Yaa ku lug leh?

UnitedHealth Group Incorporated ("UHG") waa shirkad faa'iido doon ah oo fadhigeedu yahay Minnesota oo bixisa qorshooyinka caymiska caafimaadka oo bixisa caafimaadka adeegyada daryeelka dalka oo dhan. UHG waa shaqaalaysiiyaha ugu weyn ee dhakhaatiirta dalka. Oregon gudaheeda, UHG's Optum-ka hoos yimaada waxay u bixisay daryeelka aasaasiga ah, daryeelka caafimaadka dabeecadda iyo dhimirka, qalliinnada, daryeelka gaarka ah, iyo adeegyo kale in ka badan 140,000 bukaan ah sanadka 2022. Shirkaddu waxay sidoo kale u adeegtay ilaa 4,000 bukaan jiif iyo kuwa caafimaadka guriga ee gobolka. In ka badan 200,000 degane Oregon ah ayaa xubno ka ah qorshayaasha ganacsiga iyo caymiska caafimaadka Medicare Advantage ee UHG. Sannadkii hore, UHG waxay iibsatay LHC, oo ah bixiye adeegyada caafimaadka guriga iyo adeegga dabayaaqada nololsha oo waddanka oo dhan ah ee leh goobo badan oo Oregon ah.

Amedisys, Inc. ("Amedisys") waa shirkad faa'iido doon ah oo fadhigeedu yahay Louisiana. Amedisys waxay bixisaa adeegga guriga ee dabayaaqada nololsha, daryeelka cudurada waaro, iyo adeegyada caafimaadka guriga ee 38 gobol. Oregon gudaheeda, Amedisys waxay ka hawlgashaa saddex hay'adood oo caafimaadka guriga ah oo ku yaal Salem, Portland, iyo Roseburg, iyo hal wakaalad adeegga dabayaaqada nololsha oo ku yaal Roseburg. Amedisys waxay u adeegtaa ilaa 5,000 bukaan oo caafimaadka guriga ah iyo 500 bukaan jiif o reer Oregon ah sanadkii.

Wuxuu qorshuhu ku saabsan yahay

Heshiiskan, UHG waxay si buuxda u yeelan doontaa Amedisys. UHG iyo Amedisys waxay sheegeen inay ku tala jiraan inay sii wadaan caafimaadka guriga iyo adeegyada dabayaaqada nololsha ee ay bixiso Amedisys ee Oregon. Goobaha Amedisys waxay sii wadi doonaan inay aqbalaan isla caymisyada, oo ay ku jiraan Medicare, Oregon Health Plan iyo Medicare Advantage. UHG waxay leedahay heshiisku wuxuu u ogolaanayaa Optum inay ballaarisoo baaxadda iyo caymiska juqraafiga ee adeegyada caafimaadka guriga ee ay heli karaan dadka deggan Oregon.

Maxaa xiga?

OHA waxay samaynaysaa dib-u-eegis dhamaystiran oo heshiiska si loo fahmo sida uu u saamayn karo qiimaha iyo tayada daryeelka caafimaadka, helitaanka adeegyada, iyo sinnaanta caafimaadka. Inta dib-u-eegidu socoto, OHA waxaa uu isticmaali doonaa macluumaadka daryeelka caafimaadka, wararka iyo warbixinada warbaahinta, xogta laga helo shirkadaha, iyo afkaarta dadweynaha si go'aan looga gaaro bal in heshiiska loo oggolaado inuu sii socdo.

Waxaan dooneynaa inaan adiga rayigaaga maqalno!

Fikradaha dadweynaha ayaa muhiim u ah dib u eegidda OHA! Jawaab-celintaada ayaa naga caawin karta inaan fahanno sida heshiiskan uu u caawin karo ama dhib ugu geysan karo dadka bulshadaada. Si aad noola wadaagto fikradahaaga iyo jawaab-celintaada ku saabsan heshiiskan, fadlan iimayl noogu soo dir hcmo.info@oha.oregon.gov. Iimaylka aad soo qoreyso gudahiisa, ku

Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka

soo dar ereyga “Amedisys,” waxa ay kula tahay, iyo inaad taageereyso ama ka soo horjeedo heshiiska.

Dokumeentigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid oo lacag la'aan ah. Nagala soo xiriir iimaylka hcmo.info@oha.oregon.gov ama lambarka telefoonka 503-945-6161. Waan aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka maqalka ku adag yahay.